Helsinki

# Sidan ayaad bii'ada iyo lacagba u dhaqaaleyn kartaa – Wax ka baro dhaqaalaha wareega ah

Somaali



Waraaqdan waxaad ka heli kartaa xog iyo talooyin ku saabsan qaabka aad u noolaan karto adiga oo bii'ada ilaalinaya oo nolol dhaqaalahaagana u wanaagsan noolaanaya. Markaad ka fikirayso doorashooyinka noloshaada maalinlaha ah waxaad dhaqaaleyn kartaa lacag iyo bii'adaba.

## Sidan ayaad ugu noolaanaysaa qaab xilkasnimo leh

- Wax iibsiga yaree.
- Iibso alaab tayadoodu wanaagsantahay oo waaraya waxaanad door bidaa alaab la soo isticmaalay.
- Muddo dheer isticmaal alaabtaada, daryeel oo hagaaji.
- Dib ugu deeq ama iibi alaabta aanad u baahnayn si qof kale uu dib ugu isticmaalo.
- Alaabta amaaho oo kireyso. Wax kasta inaad adigu yeelato daruuri ma aha. Waxaad sidoo kale alaabta wada yeelan kartaan dadka kale.
- Qashinka dib u wareeji si dib loogu warshadeeyo. Bii'ada qashin ha ku tuurin.




Sawirka daboolka: Suvi-Tuuli Kankaanpää, Tusaaleyn: Lille Santanen



# Waa maxay sababta arrintani ay faa'ido u leedahay?

- **Lacag ayaad dhaqaaleysanaysaa:** Markaad iibsato alaab waaraysa oo la isticmaalay, waxaad dhaqaaleyneysaa lacag. Markaad daryeesho oo aad dib u hagaajiso alaabtaada muddo dheer ayaay ku haynayaan. Markaas uma baahanaysid inaad alaab cusub marar badan iibsato.
- **Bii'ada ayaad dhowraysaa:** Markaad iibsato alaab ka yar kuwii aad hore u iibsan jirtay, waxaad ka gacan qaadanaysaa dhowridda iyo ilaalinta bii'ada.
- **Waxaad ka hortagaysaa isbaddalka cimillada:** Markaad iibsato alaab ka yar kuwii aad hore u iibsan jirtay waxaad yareyneysaa cadadka wax soosaarka, keenidda iyo qashinka. Taasi waxaay yareyneysaa qiiqa ka dhasha aqalka dhirta waxaayna ka hor tagaysaa isbaddalka cimilada.
- **Waxaad baranaysaa dad:** Markaad alaabta amaahato ama aad kireysato, waxaad baran kartaa dad cusub. Dadka wehelkooda iyo waxqabadka wadajirka ah ayaa nolosha mid wanaagsan ka dhigaya.
- **Faa'idada nolol-wanaagga:** Marka bii'ada, dhaqaalaha iyo bulshaduba wanaagsanyihiin adiga xataa nolol-wanaaggaaga ayaa kor u kacaya.

Miyaad ogeyd in wareejinta dhaqaalaha loola jeedo nooc dhaqaalaha ka mid ah oo agabka iyo ashyaada loo isticmaalayo si aanu israaf ku jirin oo caqli-gal ah. Taasi waa mid yareyneysa cadadka qashinka soo baxaya. Waraaqdan talooyinka ku qoran waxaay tusaale ka yihiin.



# Ku deeq, amaaho, iskaa u samee

## – Adeegyada Helsinki laga heli karo





## Maktabadaha

Maktabadaha waxaad ka amaahan kartaa buugaag luqado kala duwan ku qoran, jaraa'ido, filimaan iyo agab muusig ah. Waxaa intaas kuu dheer oo aad amaahan kartaa qalab shaqo oo kala duwan, qalab jimicsi, agabka muusiga lagu tumo iyo waxyaabo badan oo kala duwan oo kale. Maktabadaha kala duwan waxaay yaalla alaab kala duwan.

**Amaaho:** Mishiinada wax lagu dalooliyo, ulaha tennista lagu ciyaaro, cabirrada garaaca wadnaha, qoryaha dhaadheer ee barafka lagu wato, kabaha seefaha leh ee barafka lagu wato iyo agabka kala duwan ee muusiga lagu garaaco.

**Hiwaayad ka dhigo, ku shaqee, ka daabaco:** Maktabadaha waxaad ku isticmaali kartaa kombiyuutarada. Sidoo kale waxbaad ku daabacan kartaa. Maktabadaha qaarkood ciyaaraha ayaa lagu ciyaari karaa, wax baa lagu toli karaa ama waxaa lagu garaaci karaa bianoda.

→ Halkan ayaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo khuseeya maktabadaha magaalada Helsinki (ku qoran af finnish iyo af ingiriis).

Sawirka: Jussi Hellsten



# Varaamo


Varaamo waa adeegga xajisashada goobaha ee magaalada Helsinki leedahay. Varaamo waxaad ka heli kartaa goobo iyo agab kala duwan oo aad lacag la’aan ama jabni ku qabsan karto. Waxaad qabsan kartaa qolalka shirarka, goobo shaqo, goobo xaflado, goobo munaasabado, istuudiyoyaal, guryo iyo sauna. Waxaad sidoo kale qabsan kartaa oo aad adeegsan kartaa agab kala duwan sida mashiinka daabacaadda ee 3D iyo xarqaanada tolmaha.

→ [Xajjiso goobaha iyo agabka magaalada (boggu wuxuu ku qoranyahay af finnish iyo af ingiriis).]





Sawirka: Karun Verma



# Baaskilada magaalada

Baaskilada magaaladu waa baaskiilo ay dadka oo dhan si wada jir ah u isticmaali karaan. Baaskiilka magaalada waxaad kireysan kartaa maalin, toddobaad ama muddo dhan. Bilo badan ayaad sidoo kale baaskiilka kireysan kartaa markaad dalab joogtaysan ka sameysato bogga internetka ee baaskileedada magaalada. Safarkiiba wuxuu qaadan karaa ugu badnaan hal saac. Baaskileedada waxaa la isticmaalaa guga illaa deyrta.

→ [Internetka iska diwaangali oo ka kireysa baaskiilka magaalada muddada aad u baahantahay (boggu wuxuu ku qoranyahay af finnish iyo af ingiriis).]



Sawirka: Jussi Hellsten



# Faaradaha farsamada gacanta ee Uusix

Faaradaha farsamada gacanta ee Uusix waa goobo waxqabadka shaqada ee baxnaaninta leh. Faaradahaas waxaa dib loogu hagaajiyaa ama lagu sameeyaa agab ka sameysan alaabta dib loo soo wareejiyay oo waaraya.

**Ku deeq:** Baaskiilo iyo qaybo ka mid ah baaskiilada, waaraad, sharraxaad yaryar, qalabka dhismaha, agabka alwaaxa ah iyo agabka birta ah.

Haddii shirkadda gurigu ay rabto inay faaradda Uusix ugu deeqdo baaskiileedada ay barxadda ka soo saartay ama qaybo ka mid ah, shaqaalaha faaradda ayaa lacag la'aan ku soo qaadanaya.

**libso:** Alaab farsamada gacanta lagu sameeyay, kombiyuutaro la hagaajiyay, qaybo ka mid ah kombiyuutarada, baaskiilado la hagaajiyay, qaybo ka mid ah baaskileeddada, agabka wax lagu dhiso.

→ Macluumaad dheeraad ah oo af finnish ku qoran ka akhriso faaradaha Uusix.





Sawirka: Ninni West

# Xarunta shaqada ee Pakila (Pakilan työkeskus)

Xarunta shaqada ee Pakila waxaa lagu qabanqaabiyaa waxqabad shaqo oo baxnaanin leh. Xaruntaas shaqo waxaa lagu diyaariyaa oo dib loogu hagaajiyaa agab ka sameysan ashyaa dib loo warshadeeyay.

**libso:** Qalab dib loo hagaajiyay iyo xarunta shaqada alaab lagu diyaariyay oo guriga loo isticmaalo iyo alwaaxda kululeynta.

→ Ka akhriso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xarunta shaqada ee Pakila.



Sawirka: Jussi Hellsten




# Xarunta dib u warshadeynta ee caasimadda iyo nawaaxigeeda (Pääkaugunkiseudun Kierrätyskeskus)

Pääkaupunkiseudun kierrätyskeskus waa shirkad bulshada u shaqeysa. Waxaay taageertaa oo ay dhiirigalisaa dib u isticmaalidda dharka iyo agabka waxaayna faafiisaa xog ku saabsan arrimaha bii'ada. Intaas waxaa u dheer inay fursad shaqo u sameyso dadka shaqo la'aanta ah.

Tukaamada xarunta dib u warshadeyntu waxaay ku yaallaan meelo badan oo caasimadda iyo nawaaxigeeda ah.

**Ku deeq ama iibso:** Dhar, buugaag, maacuun, baaskiilado, agabka guriga, roogag, waaraadka guriga, alaabta carruurtu ku ciyaarto, cd-yada muusiga, mashiinada guriga iyo qalabka elegtrooniga ah.

**Ku qaado lacag la'aan:** Tukaamada oo dhan waxaay sidoo kale leeyihiin qayb alaab lacag la'aan ah laga qaadan karo.



Sawirka: Jussi Hellsten

→ Indha-indhee qoraal af finnish ama af ingiriis ku qoran oo lagaga hadlayo waxqabadka Xarunta dib u warshadeynta.



# Xarunta dib u warshadeynta ee Stara

Xarunta dib u warshadeynta ee Stara (Staran kierrätyskeskus) waxaa lagu iibiyaa hanti ay leedahay magaalada Helsinki oo aanan la isticmaalin. Agabyada gaarka ah waxaa lagu xaraashaa bogga kiertonet.fi sannadka oo dhan. Gaadiidyada iyo mashiinada shaqada iyo agabka kale ee waawayn waxaa lagu iibiyaa tartanka iibinta ee u gaarka ah guga iyo deyrta.

**libso:** Mishiinada shaqada iyo mishiinada yaryar, mishiinada jimicsiga, mishiinada farsamada gacanta, agabka dhismaha iyo gaadiidka.

→ Ka fiiri macluumaadka xidhiidhka ee Stara, waydii ama ka falceli (boggu wuxuu ku qoranyahay af finnish iyo af ingiriis).





Sawirka: Jussi Hellsten

# Machadka waxbarasho ee shaqaalaha Helsinki

Machadka waxbarasho ee shaqaalahu (Helsingin työväenopisto) waa machad waxbarasho oo dadka oo dhan u furan. Machadka waxbarashada waxaa ku diyaarsan koorsooyin noocyo badan oo luqado kala duwan ku baxaya.

→ Macluumaad dheeri ah ka hel koorsooyinka iyo munaasabadaha machadka waxbarashada ee shaqaalaha iyo munaasabadaha.

Baro farsamooyinka gacanta Kumanaanka koorsooyinka iyo munaasabadaha ah waxaad ka dhex heli kartaa koorsooyinka dib u habeynta iyo cusboonaysiinta agabka ama waaraadka.

→ Iska diwaan gali adiga oo u maraya adeegga ilmonet.fi (boggu wuxuu ku qoranyahay af finnish iyo af ingiriis).





Sawirka: Karun Verma



# Alaabta barxadaha iyo jardiimooyinka lagu iibiyo

Ma ogtahay inaad alaabta aad soo isticmaashay ku iibin karto barxadaha iyo jardiimooyinka dadka ka dhaxeeya?

Haddii aad alaabtaada ka dul gadayso alaab aad dhulka dhigatay oo aanaad dadka meesha maraya ka hor taagneyn, uma baahnid inaad magaalada fasax ka codsato. Xasuuso si kastaba inaad nadiifiso meelaha aad wax ku gadeysay kana qaad alaabta aan kuu gadmin.

Helsinki sidoo kale waxaa ku yaalla goobo ay dadku wakhtiga xagaaga ku kulmaan oo ay alaabtooda ku gataan. Qof si gaar ah u qabanqaabinaya ma jiro wakhtiyadaas alaabta la iibinayo ee qof kastaa isaga ayaa ka mas'uul ah goobta uu wax ku iibsanayo. Munaasabaddu in laguu oggolaado ayaay u baahantahay haddii jardiinada nawaaxigeda ay yimidaan dad badan oo wax iibinaya iyo haddii iibinta agab loo isticmaalo sida kuraas iyo miisas.



Sawirka: Ninni West

→ Hel jardiinooyinka guud ee wax lagu gado (wakhtiga xagaaga oo kaliya).

→ Codso oggolaanshah iibinta alaabtaada.

# Khaariddada ka hel adeegga

## Khaariddada adeegyada caasimadda iyo nawaaxigeeda

Khaaridada adeegyadu waa mid elegtroonig ah oo aad si fudud uga raadin karto adeegyada kala duwan sida dugsiyada, xarumaha caafimaadka iyo maktabooyinka. Waxaad sidoo kale adeeggaas ka dhex heli kartaa adeegyada dhaqaalaha wareejinta iyo adeegyo badan oo ay bixiyaan shirkado brayfat ah Ka dooro bogga adeegga aad raadinayso si aad uga aragto goobta uu ka shaqeeyo khaaridada.

**Hel:** Suuqal axaddada, adeegyada dib u hagaajinta, goobaha isticmaalka wadajirka ah, adeegyada amaahashada iyo adeegyada kireynta.

→ Halkan ayaad ka gali kartaa khaariddada adeegga caasimadda iyo nawaaxigeeda (adeeggu wuxuu ku qoranyahay af finnish, af iswidhis iyo af ingiriis).






# Kala soocidda qashinka – Hel xogta

Kala soocidda qashanku waa muhiim si aanay khatar u keenin. Marka qashinka si sax ah loo kala sooco waxaa suuro gal ah in dib loo warshadeyn karo.




## HSY (Helsingin seudun ympäristö-palvelut) oo ah Adeegyada bii'ada ee Helsinki iyo nawaaxigeeda

HSY waxaay bixisaa adeegyada daryeelka biyaha iyo daryeelka qashinka ee magaalada Waxaay soo saartaa xogta ku saabsan dhaqaalaha wareejinta si joogto ahna way uga shaqeysaa.

**Bogga raadinta macluumaadka ee Jäteopas:** Ma taqaanid miyaa meesha aad geyn karto qashinkaaga? Hagitaanka qashinka (Jäteopas) ayaa kaa kaalmeynaya. Waxaad hagitaanka qashinka ka heli kartaa bogga internetka ee HSY. Ku qor meesha raadinta macluumaadka ee bogga magaca qashinka. Waxaa lagaa hagayaa qashinkaas noociisa iyo meesha aad geyn karto.

**Hagitaanka:** Bogga internetka ee HSY waxaad ka heli kartaa hagitaanada kala duwan ee guriga iyo macluumaadyo qoraal ah. Hagitaanada iyo qoraaladu waxaay ku qoranyihiin luqado badan sida af finnish, af iswidhish, af ingiriis, af ruush, af carabi, af soomaali, af faransiis, af dari, af sorani iyo af tigtinja.



Sawirka: Hannu Bask / HSY

→ [Halkan ayaad ka gali kartaa hagitaanka qashinka ee HSY (hagitaanka qashinku wuxuu ku qoranyahay af finnish iyo af ingiriis).]

→ [Halkan ayaad ka soo dejjisan kartaa warbixinno elegtroonig ah ama iyagoo lacag la'aan ah ayaad gurigaaga ku dalban kartaa.]



## Bogga InfoFinland

Adeegga internetka ee **InfoFinland.fi** waa bog internetka ah oo luqado badan ku qoran. Bogga waxaa ku qoran macluumaad badan oo muhiim u ah qofka Finland soo degay ama qorsheynaya inuu Finland soo dego. Bogga waxaad ka heli kartaa hagitaan ku saabsan kala soocidda iyo dib u warshadeynta qashinka.

**Hagitaanka:** Hagitaanka kala soocidda qashinku waxaay ku qoranyihiin 12 luqadood. Luqadahaas oo kala ah af finnish, af iswidhish, af ingiriis, af ruush, af estooniyaan, af yukraeniyaan, af faransiis, af isbaanish, af turkish, af shiinees, af farsi iyo af carabi.

→ Halkan ayaad ka heli kartaa hagitaanada kala soocidda qashinka iyo dib u warshadeynta ee bogga InfoFinland oo ingiriis ku qoran.





Sawirka: Maija Astikainen

## Sidan yeel markaad qashinka kala soocayso

- Qolka qashinka ee shirkadda guriga waxaad ku reebi kartaa oo kaliya qashinka uu u yaallo weel lagu rido oo u gaar ah. Waa in qashinku uu deeqaa weelka qashinka ee ad ku ridayso.
- Qolka qashinka iyo nawaaxigiisa nadaafaddiisa ku dadaal, si aanu jiirku u sii tarmin.
- Qolka qashinka lama gayn karo agab koronto ku shaqeeya, agabka waawayn ama halista keeni kara, sida daawooyinka, baytariyada, ranjiga iyo kemikaalada.
- Daawooyinka farmasiga gee baytariyadana tukaanka.
- Agabka waawayn waxaad gayn kartaa xarunta Sortti, haddii aad baabuur haysato.
- Haddii aanad baabuur haysanin waxaad codsan kartaa adeegga soo qaadista alaabta waawayn. Magaca adeegga soo qaadisku waa Sortti-nouto.





Sawirka: Suvi-Tuuli Kankaanpää / HSY / Keksi Agency

→ Ka codso Sortti-nouto bogga internetka ee HSY (ku qoran af finnish iyo af ingiriis).

→ Fiirso wakhtiyada ay furanyihiin xarumaha Sortti.

→ Ka fiiri goobaha ururinta khaariddada elegtrooniga ah ee bogga Kierrätys.info.

# Xiriiriyeyaasha adeegyada

→ Maktabadda shabakadda ee Helmet: helmet.fi

→ Goobo iyo agab: varaamo.hel.fi

→ Baaskilada magaalada: hsl.fi/kaupunkipyorat

→ Uusix workshops: uusix.fi

→ Xarunta shaqada ee Pakila: pakilantyökeskus.fi

→ Pääkaupunkiseudun kierrätyskeskus – Xarunta dib u warshadeynta: kierratyskeskus.fi

→ Stara: stara.hel.fi

→ Työväenopisto – Machadka waxbarasho ee shaqaalaha Helsinki: tyovaenopisto.hel.fi

→ Koorsooyin: ilmonet.fi

→ Khaaridada adeegyadu: palvelukartta.hel.fi

→ Bogga raadinta macluumaadka ee Jäteopas: hsy.fi/jateopas

→ Bogga InfoFinland: infofinland.fi

→ Xarumaha Sortti: hsy.fi/sorttiasemat

→ Goobaha ururinta: kierratys.info

→ Jardiinooyinka guud ee wax lagu gado wakhtiga xagaaga: stadissa.fi



Helsinki

Tämä on somalinkielinen
kiertotaloutta käsittelevä esite.

**Deegaanka**
**Magaalada**
**Helsinki**

**Cinwaanka Booqashada**
Työpajankatu 8
00580 Helsinki

**Cinwaanka Boostada**
PL 58200
00099 Helsingin kaupunki (Magaalada Helsinki)

**Telefoonka dhaxe**
+358 (0)9 310 2611

**hel.fi/kaupunkiymparisto**

Deegaanka Magaalada buug-yarayaasha 2024:2